

# Taageerada dhaqaalaha

– ee loogu talloagalay bukaanada kansarka



Ma tahay adiga ama qoyskaaga kuu dhow bukaan kansar qaba oo la dhibaatooneysid dhaqaalaha qoyskaaga? Ururka Kansarka Norway waxay awoodaan inay ku siiyaan lacago gaarayo 3,000-20,000 NOK adiga ama qoyskaaga kuu dhow haddii uu ku saameeyay kansarka

## **Codso taageero dhaqaale haddii aad u baahantahay:**

- Deeq loogu talloagalay gargaar inta aad ku jirtid dhibaatooyinka dhaqaalaha
- Haddii aad kordhisay qarashaadkaaga iyo/ama qasaaraha daqliga
- Haddii aad qabtid kharashaad aan gobolka daboolin
- Barnaamijyada dhaqancelinta ama madaddaalada/ daryeelka ee qoyskaaga oo dhan (daaweynta dibadda uma qalmaan)

## Yaa u qalmo taageerada?

- Dadka degan Norway ee ku helayo daaweyn nidaamka daryeelka caafimaadka Norway.
- Wadarta iska bedeleyso 3,000 NOK ilaa 12,000 NOK ayaa loo heli karaa codsadaayaasha kaliga ah, halka wadarta ilaa 20,000 NOK loo heli karo waxay ku xirantahay tirada dadka ku jiro qoyska codsadaha.
- Duruufaha dhaqaale ee codsadaha waxaa lagu qiimeynayaa iyadoo lagu salaynayo mushaarkooda biled, qarashayada guryaha, deenta iyo hantida ku saleysan heerka miisaniyada oo ay diyaarisay Consumption Research Norway (SIFO) ee Jaamacada Oslo Metropolita.

## Sidee loo codsado?

- Waqtiga cayiman ee billaha ee codsiyada waa 10ka bil kasta
- Ku buuxi foomka codsiga warqad ama elektaroonig ahaan
- Ugudbi codsigaaga [www.kreftforeningen.no/tilbud](http://www.kreftforeningen.no/tilbud) hoosta badhanka taageerada dhaqaalaha ('økonomisk støtte' in Norwegian)

## U soo gudbi dukumiintiyada xigo sida lifaaqa codsiga:

- Rashiidka mushaarka ugu danbeysay ama bayaanka ay soo saartay NAV ee loogu tallogalay dhammaan dadka guriga ku nool
- Canshuur celinta ugu danbeysay ama qiimeynta canshuurta ee dhammaan dadka ku nool qoyska ee ka weyn 18 sanno
- Shahaadada caafimaadka ee ay bixiyeen la taliyaha isbitaalka ama Dhaqtarkaaga Guud (GP), ama badelkeeda nuqulka dukumiinti kale oo sheegayo baaritaanka kansarkaaga

Haddii aad qabtid su'aalo, fadlan nala soo xiriir adigoo soo wacaya +47 21 49 49 21 ama i-meelka noogu soo dir [rettigheter@kreftforeningen.no](mailto:rettigheter@kreftforeningen.no).



**KREFTFORENINGEN**